

Haddii aad tahay qof ey carruur u dhigtaan dugsiyada sare ee Norrköping

2020-05-07

Warbixin ku socota waalidka/ qofka leh masuuliyadda sharciyeed ee ilmaha

Salaan,

Cudurka Corona iyo waxyeelladiisa waxey si xooggan saameyn ugu reebeen shaqada dugsiyeenna sare muddo laba bil hadda ah. Culeyska dhinaca shaqada iyo kan saaran shaqaalaha wuxuu ahaa mid sare waxaana u shaqeyneynay qaab si fudud loo bedbedeli karo annagoo waqti yar gudihis xaaladeyna waafajineyna talooyinka iyo habraaca Hey'adaha. Laakiin waxaan ku faani karnaa in dugsiyada sare ee Norrköping ey muddadaan gudaheeda xattaa ku guuleysteen iney xoogga saareen waxbarasho tayadeeda sarreyso. Taasna waxaa horseed u ahaa ardaydeenna wanaagsan, shaqaalahaenna carboon iyo taageerada aan idinka helnay haddii aad tihin waalidiinta.

Is bedelka gogaansho wax ka baradka wuxuu aaha mid aan dhibkiisa yareyn maalina maalinta ku xigta inkastoo uu noqday mid ka wanaagsan sida aan fileynay. Waxaan habeynay qaab cusub oo aan waxbarashada ugu dhigno ardaydeenna dugsiyada sare. Arday walba asaga ayaa sameystay goobta uu ka shaqeynayo, in uu rootiin shaqo guriga ka sameysto, in uu si wanaagsan oo maamuus ku dheehan uga shaqeeyo casharrada iyo inuu si firfircoon uga qeyb qaato waxbarashada oo qaab fogaansho ah uu ula soconayo.

Hadda waxaa yimid kuleelka xilliga guga weyna fududahay in loo maleeyo iney wixii jiray na dhaafeen, laakiin waan la soconaa in halkan ey wali xaaladdu tahay mid khatar ah isla markaana in Hey'adda caafimaadka dadka eysan wali khafiifin talooyinka ey dhiibtay. Fogaansho wax ka baradka wey sii soconeysaa iyada oo xoogga la saarayo waxbaridda iyo sare u qaadidda aqoonta arday walba. Waxaan rajeyneynaa in aad sii waddaan fahanka aad fahantsantihiin xaaladdeyna isla markaana aan si wanaagsan uga wada shaqeyno in aan gacan ka geysanno yarenta faafidda cudurka iyo in aan muujinno tixgelin dheeraad ah

Talo ahaan waxaan rabnaa in aan idiin sheegno in uu jiro bog internet oo khaas ah oo loogu tala galay dhallinyarada iyo carruurta kuna jira norrkoping.se. halkaas waxaan isku hal meel ku uruurinnay warbixin ku saabsan caabuqa, si ey u fududaato in la helo. Halkaas waxaa ku ku jira xog qoraalkeedu fududyahay oo caabuqa ku saabsan iyo talooyin ku saabsan sida uu qofka isaga taxaddaro iskuna ilaaliyo inta ey socoto fogaansho wax ka barashada, iyo sida qorsheysto waxbarashada. Halkaas waxaa ku jira macluumaad lagala xiriiro shaqaale yaqaanna caafimaadka ardayga, oo lala xiriiri karo haddii uu qofku welwel ka qabo caabuqa ama xaaladda cusub ee jirta. Wey fiicantahay haddii aad u sheegtid carruurtaada boggan: norrkoping.se/corona-information-till-unga

Mahadsanid!

Salaan diirran

Jonas Eriksson, madaxa dugsiyada sare

Claes Göransson, madaxa dugsiyada sare

Sofie Lindén, Maamulaha waxbarashada